



RAAGSAN

COLAADHA KU SALAYSAN DAAQA: FALANQAYNTA COLAADDA U DHEXAYSA XOOL DHAQATADA SOOMAALIYA IYO ISTARAATIIJIYADAHOO DA MAARAYNTA COLAADDA IYO XOOJINTA NABADDA

Faallo Kooban

Maarso 2024

HORDHAC

Soomaaliya waxa ay tobannaan sano la daalaadhacaysay coladdo iyo saamaynta isbeddelka cimilada oo sii cusleeyay xaaladaha jiray. Dalku waxa uu wajahay dhacdooyin cimilo oo aad u kala geddisan sida abaaro, fatahaado, roobab aan xilligooda ku di'in, dabaylo xooggan, duufaanno, dabaylo bacaad wata, iyo heerkul aad u sareeya. Arrimahani waxa ay sii badiyeeen tabashooyinkii iyo xasaradiihii bulshooyinka u dhexeeyay, kuwaas oo huriyay khilaafaadkii u dhexeeyay xoolo dhaqatada iyo beeralayda, maadaama bulshooyinka xoolo dhaqatada ah iyo kuwa negi ay ku loollamaan khayraadka xaddidan. Barakaca ka dhasha coladdahaas ayaa horseeday in ay dadka isugu tagaan goobo cirrii ah oo markii horaba khayraadku ku yaraa, tani oo sii abuuraya qalalaase iyo khilaafaad hubaysan. Inkastoo uusan xiriir toos ah ka dhexeyn isbeddelka cimilada iyo coladdaha, cilmbaarayaashu waxa ay ku doodaan in isbeddelka cimiladu uu xiriir aan toos ahayn iyo saamayn ku yeelan karo khataraha coladdaha. Qormadani, waxa aan ku gorfaynaynaa sababaha dhaliya coladdaha u dhexeeyaa bulshooyinka xoolo dhaqatada ah ee Soomaaliya iyo istaraatijiyyadaha maaraynta coladdaha iyo xoojinta nabadda (ICRC, 2021).

Faallo siyaasadeedkan waxa ay iftiiminaysaa cilmbaarlis baaxad weyn oo muddo dhowr sano ah ay Shirkadda Raagsan ka samaynaysay Galmudug, oo lagu kaabay aragtiyo xeeldheerayaal. Faalladani waxa ay si qoto dheer ugu kuurgalaysaa sababaha aasaaska u ah coladdaha dhex mara bulshooyinka xoolo dhaqatada ah ee Soomaaliya iyo sahminta istaraatijiyyooyinka kala duwan ee ay adeegsadaan bulshooyinkaasi si ay wax uga qabtaan coladdaha, una horseedaan nabad. Falanqaynta arrimahan xasaasiga ah waxa ay siyaasad-dejiyeeyasha, iyo fuliyeyaashuba ku ogaan karaan tallaabooyin wax-kuool u ah nabad dhisida, kuwaas oo la hirgalin karo lana ballaarin karo, si sare loogu qaado xasilloonida iyo baraaraha guud ahaan Soomaaliya.

SAHMINTA SABABAHA COLAADHA EE GALMUDUG

Galmudug waxaa ka jira coladda weyn oo ka dhex aloosan qabaa'ilka. Si joogto ah aaya waxaa magaaloooyinka isu dhow uga dhacaan weeraro aargoosi ah iyo kuwo rogaalcelis ah kuwaas oo ay ka dhashaan dhaawac iyo dhimasho boqollaal qof iyo burbur hantiyeed. Saamaynta qotada dheer ee qabyaaladda, isxulafaysiga kooxaha iyo loollanka ka jira deegaannada Galmudug ayaa sii adkaynaya maaraynta khilaafaadka (Berghof Foundation, 2019). Xoolo dhaqatada ayaa sidoo kale xaaladda qalalaase ee goobahaasi uga sii dara, iyada oo sababta ugu weyn ee iskudhacyada ay tahay ku loollamidda ilaha khayraadka ee xadidan ah sida biyaha iyo daaqa. Xudduudaha qabaa'ilka iyo coladdihii hore ayaa xaaladda sii murjiya, taas oo horseedaysa rabshado iyo barakac. Jadwalka 1-aad ee bogga xiga waxa uu muujinayaa beelaha Galmudug ee ay coladdaha joogtada ah ka dhexeyso ee Galmudug degan.



Jadwal 1aad: Waxyaabaha dhaliyay colaadaha ka jira Galmudug, Soomaaliya

Degaanka	Colaaddu ku Daran Tahay	Sababaha Waaweyn ee Colaadda	Saamaynta - ilaa 2022
Hananbuure iyo Bangeel	U dhexxeeya Hananbuure iyo Bangeele	Loollanka biyaha iyo dhul daaqsinka	Dhaawacyo, barakac, suuq xiran, joogsiga isusocodka reeraha
Balanbale	Jinni-faley, iyo Laan-qaylo	Wada adeegsiga(isticmaalka) ilaha biyaha, aanoo yinkii hore, iyo loollanka kheyraadka suququlka ah (yar)	Colaado iyo amni darro
Guriceel	Balanbale, Balihawd, iyo Mayeran	Murannada dhulka, loollanka kheyraadka soohdimaha reeraha, iyo colaado hore	Colaado iyo amni darro Colaado iyo amni darro
Hobyo	Haarxuseen, Goryaale iyo Qararow	Loollanka dhanka khayraadka sida biyaha, baadka, dhulka iyo daaqsinka	Xaalad nabadeed ayaa hadda jirta.

ISBEDDELKA CIMILADA IYO COLAADHA GALMUDUG, SOOMAALIYA: ISLAFALGAL CAKIRAN

Xaaladda cakiran ee u dhaxaysa isbeddelka cimilada iyo xiisadaha bulsho iyo siyaasadeed ee daba dheeraaday ayaa waxa ay si joogto ah khatar u gelinayaan nabadda aan cagaha badan ku taagnayn ee Soomaaliya. Si gaar ah, Galmudug oo ku tiirsan beeraha ku baxa biyaha roobka iyo xoolo dhaqashada ayaa ka mid ah gobollada uu sida ba'an u saameeyay isbeddelka cimilada oo sababay sare u kaca colaadaha gobolka. Isbeddelka cimilada ayaa Soomaaliya siyaabo kala duwan u saameeyay sida lagu soo koobay Jaantuska 1-aad.

Dawladda Soomaaliya oo ay ragaadiyeen xasilloonni darro iyo khayraad yari daba dheeraatay ayaa la daalaadhacaysa sidii ay u maarayn lahayd khataraha la xiriira isbeddalka cimilada iyo sugidda amniga muwaaddiniinteeda, gaar ahaan degaannada Galmudug ee magaaloo yinka ka fog (UN Somalia, 2023). Haddaba, saamaynta isbeddelka cimiladu waa mid ballaaran. Ugu horrayn, loollanka loogu jiro helidda biyaha, dhulka iyo daaqa waxa uu sababaa colaado aan dhammaad lahayn iyada oo beeluhu ay miciinbidaan in ay dagaallamaan si ay u daboolaan baahiyahooda (SIPRI, 2023). Sidoo kale, abaaraha iyo colaaduhu waxa ay dadka ku qasbaan in ay ka qaxaan guryahooda iyaga oo magangalyo bida magaaloo yinka ee horaba cirriiriga u ahaa taas oo kaga sii daraysa culaysyada dhaqaale iyo bulsho (IOM, 2023). Bulshadan danyarta ah waxa ay u nugushahay in ay askar u noqoto kooxaha hubaysan si qaldanna uga faa'iidaystaan.

Jaantuus1: Islafalgalka u dhexxeeya isbeddelka cimilada iyo colaadaha Soomaliya

1 Abaaro iyo Roobab aan Xilligoodii ku Di'in

Soomaaliya waxaa ku soo noqnoqday abaro oo tii ngu darneed tobannan ka sano ay ka dhaacday intii u dhexaysay 2021 iyo 2023. Roobabka aan xilligoodii ku di'in waxey uga sii daraan xalada biyo yaraanta, taas oo saamayn ku yeelata waxsoosaarka beeraha, sababtana in xoolo dhaqatadu ay barakacdo (FAO, 2023).

2 Xaalufinta iyo Nabaadguurka Dhulka

Nabaadguurku waa dhulka oo loo maareeyo si aan xasilloonayn oo la gaarsiiyay abaro, xaaluf degdeg ah, taas oo hoos u dhigta xaddiga dhul beereedka iyo daaqsinka (UNEP, 2023).

3 Tartanka Loogu Jiro Kheyraadka Yar

Yaraanshaha biyaha iyo dhul daaqsineedku waxey sii xoojiyan tartanka u dhexxeeya beeraleyda iyo raacatada, waxayna sii huriyaan xiisadaha iyo colaadaha bulshooyinka u dhexxeeya (Crisis Group, 2023). Tani waxay ku sii daran tahay Galmudug oo ay beeluhu wadaagaan kheyraadkuna uu kooban yahay.

ISTARAATIIJIYADAH XOOLO DHAQATADA EE MAARAYNTA IYO KA HORTAGGA COLAADAH

Muddo dheer ka hor beelaha Galmudug waxa ay barteen istiraatijiyoado ay si wax-ku-ool ah ugu maareeyaan uguna hortagaan colaadaha, taas oo ka caawisay in la yareeyo iskudhacyada lana ilaaliyo nolosha dadka iyo xoolaha. Jaantuska 2-aad waxa uu muujinayaa qaar ka mid ah istaraatijiyoado ka hortagga iyo maaraynta colaadaha oo ay adeegsadaan beelaha Galmudug.

Jaantus 2: Istiraatijiyoado maareynta colaadaha ka jira Galmudug

 Xayiraadda dhuleed	 Kormeerka iyo Islaxiriirkha	 Dhexdhexaadinta ay bulshadu samayo	 Dawladda	 Dhisidda maleeshiyo beeled ilaalisina nabadda
Xoolo dhaqatada waxa ay dhaqdhaqaqooda ku xaddidaan xayndaabka dhulka ay degaan qabiilladooda, iyaga oo ka fogaanaaya meelaha la og yahay in ay ka jiraan colaado, yaraynaya khatarta ka imanaysa iska hor imadyada beelaha kale.	Xoolo dhaqatada waxa ay ku tiirsan yihii xiriir ay la sameeyaan saaxiibo ku sugaran goobo kale si ay u hubiyaan amniga wadooyinka taga meelo kale.	Guddiyada degaannada, maamulka, odoyaal dhaqameedka, culimada, iyo bulshada qaybaheeda kale ee qabiillada dega Galmudug ayaa qabta kullamo wada-xaajooedyo oo lagu xoojinaayo nabad kuwada noolaanshiyaha bulshada.	Dawladdu waxay kaalin mug leh ka ciyaartaa ka hortagga caloodaha degaannada ay ku xoogan tahay. Tusaale ahaan dawladda ayaa masuul ka ah sugidda amniga magaalada Guriceel.	Goobaha aysan ka jirin maamul dawladeed ama urur diimeedyo hubaysan, beelaha ayaa dhisa maleeshiyo beeleddyo ilaaliya degaannada xilliyyada colaadaha.

KAALINTA ODAY DHAQAMEEDYADA EE KA HORTAGGA IYO MAARAYNTA COLAADAH SOOMAALIYA

Soomaalida dhexdeeda, oday dhaqameedka wuxuu kaalin muhiim ah ka ciyaaraa go'aannada, xallinta khilaafaadka, iyo ilaalinta nidaamka bulshada. Bulshada Soomaalidu waxay u dhisan tahay hab qabiileed, oday dhaqameedyadana aad ayaa loo tixgeliyaa oo waxa ay dhexdhexadiyan beesha iyo qaybaha kala duwan ee reerka. Aqoontooda ballaaran iyo khibradda ay u leeyihiin xeerarka iyo dhaqanka ayaa ka dhigta kuwo udubdhexaad u ah ilaalinta isku haynta iyo midnimada bulshada Soomaaliyeed. Cuqaasha reeraha waxay lafdhabar u ahaayeen nabadda iyo xasilloonida bulshada, gaar ahaan intii lagu jiray xilligii burburka ka dib iyagoo colaado fara badan ku xalliyay wadahadal iyo dibuheshiisiin intii ciidan la adeegsan lahaa (Farah, 2010). Odaydhaqameedyada beelaha Galmudugna wax ay ka soo dhalaaleen kaalintii laga filayay ee ahayd in ay ka hortagaan ama maareeyaan colaadaha u dhexeeya xoolo dhaqatada. Odayashu waxa ay hormuud ka noqdeen hormarinta iyo fulinta istiraatijiyoado xallinta colaadaha, sida heshiisyoo beeled lagu wadaagayo daaqa, dibuheshiisiin, iyo nabadaynta beelaha uu dagaalku dhex maro.

Dadaallada Hadda Jira ee Maaraynta Colaadaha iyo Horumarinta Nabadda Galmudug .

Dhawr hay'adood oo caalami ah, sida ururrada gobolka iyo hay'adaha maxalliga ah oo ay ku jirto dawladda ayaa abuuray barnaamijyo iyo hindisiyaal lagu maaraynayo colaadaha deegaannada Galmudug, si loo horumariyo nabadda.

Dawladda Galmudug ayaa kaalin weyn ka ciyaartay xoojinta nabadda iyo dib u heshiisiinta ee Galmudug oo ay ka mid yihii aasaasidda ciidan nabadgalyo oo maxalli ah iyo billaabidda wadahadallo dhex mara beelaha kala duwan ee gobolka. Dadaalladu waxay socdeen tan iyo markii Galmudug la aasaasay sannadkii 200 (Garowe Online, 2024).



Hay'adaha caalamiga ah waxaa ka mid ah Qaramada Midoobay (QM) oo adeegsanaysa laamaheeda kala duwan sida Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSO) iyo Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP) ayaa kaalin muhiim ah ka cayaaray geeddi socodka nabadda Galmudug. UNSOM waxa ay taageertaa dadaallada nabadda iyo dibuheshiisiinta (UNSO, 2024), halka UNDP ay diiradda saarto mashaariicda horumarinta muddada fog ee lagula tacaalo sababaha dhabta ah ee colaadaha (UNDP Somalia, 2024). Dadaalladoodu waxay soo jireen laga billaabo horraantii sannadka 2010 ilaa iyo hadda. QM ayaa sidoo kale Midowga Afrika (MA) ayaa iskaashi ka yeeshay dadaallada nabad ilaalinta iyada oo adeegsanaysa ciidamada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ee la geeyay Galmudug. AMISOM wax ay kaalin mug leh ka qaadatay nabadaynta degaannada Galmudug wixii ka dambeeyay dhammaadkii 2010 welina wax ay bixisaa taageero amni (UN, 2024).

Urur-goboleedka IGAD ayaa isaguna kaalin ka qaatay fududaynta wadahadallada iyo heshiisyada nabadeed ee u dhxeeyaa kooxaha kala duwan ee degaannada Galmudug. Hawlahan ayaa soo socday tan iyo bilowgii 2000 iyada oo la xoojiiyay sannadihii u dambeeyay (ReliefWeb, 2023).

Hay'adda Caalamiga ee Socdaalka (IOM) iyo Midowga Yurub (MY) ayaa Galmudug ka fulinaya mashaariic dhawr ah oo khuseeya xoojinta xalalka ay bulshadu hormuudka ka tahay iyo maalgashiga helidda iyo maaraynta biyaha. Hay'adda IOM ayaa iminka ku hawlan mashruuca "Transhumance Tracking Tool Project" oo ururiya xogta isusocodka dadka kana caawiya bulshada wadajirka iyo xal u helidda colaadaha la xiriira khayraadka dabiiciga. Sidoo kale Hay'adda IOM ayaa dhisaysa kaabayaal ay ku horumariyaan maaraynta khayraadka dabiiciga ah. Ujeeddada gaarka ah ee mashruucani waa in uu saamayn togan ku yeesho qaybaha kale ee dalka (IOM, 2022).

Ururrada ay ka midka tahay Search for Common Ground (SFCG) ayaa Galmudug ka hirgelisay mashaariic nabad dhis oo kala duwan oo xoogga saaraya xallin khilaafaadka, wadahadallada nabadeed ee bulshada, iyo hindisooyinka.

Dadaalladaan weli socda waxay billowdeen bartamaha 2010 (SFCG, 2024).

Mercy Corps ayaa Galmudug ka hirgelisay barnaamijyo cunto qaybin, helidda biyo nadiif ah, adeegyo fayadhowr, kaalmo nololeed, oo ay wehliyaan taabbagelinta hindiseyaasha nabad dhiska. Dadaalladooda oo weli socda waxay billowdeen bartamaha 2010 (Mercy Corps, 2024).

Hay'adda Somali Peace and Development Network (SPDN) ayaa sidoo kale ka shaqaysa nabad dhiska, arrimaha xuquuqul insaanka, iyo dawlad wanaagga Galmudug. Hawlahooda waxaa ka mid ah dhexdhexaadinta khilaafaadka, waxbarashada madaniga iyo xoojinta kaalinta haweenka iyo dhallinyarada ee geeddi socodka nabadda. SPDN waxa ay hawlahan soo wadday tan iyo horraantii 2000 (SPDN, 2024).

Hay'adda Berghof waxa ay taageertaa dadaallada nabad dhiska Galmudug iyada oo xoojinaysa kartida nabad dhiseyaasha, kor u qaadista wacyiga ku aaddan saamaynta isbeddelka cimilada ee colaadaha, iyo aasaasidda shabakad nabad dhisid iyada oo la adeegsanayo hannaanka shirarka dhaqanka ee Soomaalida. Ujeedka mashruucu waa xoojinta Kaabayaasha Nabadda, samaynta barnaamijyo idaacad, iyo la shaqaynta dawladda si loo gorfeeyo loona yareeyo colaadaha iman kara (Berghof Foundation, 2023).

Jadwalka 2-aad waxa uu soo koobayaa hindiseyaasha kale ee nabad dhiska iyada oo loo soo bandhigayo sida ay u kala horreeyeen. In kastoo uusan ahayn mid ballaaran, liiskan waxa uu muujinayaa caddaymaha dadaallada nabad soo celinta ee ay Galmudug ka sameeyeen dhinacyo kala duwan.

Jadwal 2: Dadaalladii hore iyo kuwa hadda jira ee lagu yaraynayo colaadaha degaannada Galmudug

Xilliga	Dadaallada/Hindiseyaasha
Horraanta 2000	<ul style="list-style-type: none"> IGAD waxay fududaysay wadahadal nabadeed oo u dhxeeyaa kooxaha Galmudug (Tixraac: https://reliefweb.int/report/somalia/Galkayo-peace-week-reflection-strengthening-social-cohesion). Ururrada Bulshada Rayidka (CSOs) ayaa xoogga saaraya nabad dhisid ku salaysan wadahadal, dhexdhexaadin iyo horumarinta xuquuqul insaanka (Tixraac: SPDN, local NGO).
Bartamaha 2000	<ul style="list-style-type: none"> Hay'adda Somali Peace and Development Network (SPDN): waxay fulisaa barnaamijyo nabad dhis ah oo diiradda lagu saarayo dhexdhexaadin, tacliinta madaniga iyo ka talagelinta haweenka iyo dhallinyarada (Tixraac: SPDN website). Dowlad Goboleedka Galmudug: Waxaa la aas aasay 2006-dii, waxa ay door muhiim ah ka ciyaartaa horumarinta nabadda iyadoo adeegsanaysa ciidamada amniga ee deegaanka iyo wada-hadalka bulshada (tirxraac: website-ka dowlad goboleedka Galmudug).
Dhamaadka 2000	<ul style="list-style-type: none"> AMISOM waxay ciidan geysay Galmudug si ay kaalin muhiim ah uga ciyarto nabadeynata degaanka (tirxraac: UNNews, https://peacekeeping.un.org/mission/past/unosom1backgr2.html). UN SOM waxay taageertaa dadaallada dibuheshiisiinta iyo amniga si ay u xalliso sababaha dhabta ee colaadaha keenay (tirxraac: UNSOM website)
Horraanta 2010	<ul style="list-style-type: none"> Mercy Corps waxay fulisaa barnaamijyo la xiriyo amniga cuntada, nadaafad/biyo/fayadhowr, iyo adeegyo maciishad abuur iyo dadaallo nabad dhis ah (tirxraac: Mercy Corps website). Search for Common Ground (SFCG) waxay billaabaysaa fulinta dadaallo xallinta khilaafaadka, wadahadal bulsho, iyo dibuheshiisiin (tirxraac: SFCG website). UNDP waxay xoogga saartaa mashaariicda horumarineed ee waqtiga dheer lagu xallinayo waxyaabaha colaadaha sababa (tirxraac: UNDP Somalia website). Shirarka Nabadeynata iyo Dibuheshiisiinta Galmudug waxay is horfariisiyeen kooxaha dagaallamaya iyo hoggaanka bulshada, si lagaga hadlo xabbadjoojin iyo heshiisyoo dibuheshiisiineed (International Crisis Group, 2012).
2019	<ul style="list-style-type: none"> Dhismaha Guddiga Nabadeynata iyo Dib u hagaajinta Galmudug: Guddiga, oo ka kooban wakiillo ka kala socda qabaa'il iyo bulshooyin kala duwan, ayaa door muhiim ah ka ciyaaray shaqada iyo ilaalinta. (Galmudug State website, 2019).
2020s	<ul style="list-style-type: none"> Toddobaadka Nabadda ee Gaalkacyo: Waxaa la billaabay 2021-ka, waxa uu sare u qaadayaaa nabadda iyo wada jirka bulshada Galmudug iyo tan Puntland (tirxraac: ReliefWeb) Wadahadalka Beelaha Galmudug: Wadahadalkan oo uu fududeeyay guddiga nabadaynta iyo dibuheshiisiinta Galmudug ayaa horseeday heshiisyoo kheyraad wadaag ah iyo heybad nabadeed oo lagu xalliyo khilaafaadka (Galmudug State Media, 2020). Tababarka Nabadaynta Galmudug iyo Xallinta Khilaafaadka: Hindisan iyo hogaamiyayaasha bulshada iyo dhalinyarada ku tababaray farsamooyinka xallinta khilaafaadka iyo xirfadaha dhisidda nabadda (International Alert, 2021). Berghof Foundation: Waxay fulisaa mashruuca "Kaabayaasha Nabadda iyo Dhisidda Nabadda Degaanka" ee Galmudug and Hirshabeelle (tirxraac: Berghof Foundation website) ATMIS waxay taageertaa dadaallada nabad dhisidda iyo dibuheshiisiinta iyadoo adeegsanaysa aqoon-is-weydaarsiyo, gargaar cunto, iyo taageero amni (tirxraac: ATMIS website) Golaha nabadda ee dhalinyarada, sida Golaha Nabadda ee Wadajirka Dhallinyarada Mudug. Waxay abaabulaan hawlaha nabad dhisidda waxayna u ololeyaan xal nabadeed. (tirxraac: ReliefWeb)

2022	<ul style="list-style-type: none"> Mashruuca Suuqgeynta Xoolaha ee Galmudug: Mashruucan ayaa ujeedadisu ahayd in raacatada loo fududeeyo in ay xoolahooda suuq u helaan, lana ilaaliyo ilaha maciishaddooda loona yareeyo loollanka aan ku habboonayn ee kheyraadka (FSNAU, 2024).
2023	<p>Shirka Maamul u sameynta Galmudug: Shirkaan oo ahaa mid beeled ayaa looga hadlay arrimaha siyaasadda iyo amniga gudaha, iyadoo ujeeddadu tahay in la isku raaco hannaanka awood qeybsiga iyo dowladnimada (Hiiraan Online, 2023). Shirka Guddiga Nabadeynta iyo Dibuheshiisiinta Galmudug: Guddigan oo la dhisay 2019-kii ayaa sii wada dadaallada xallinta khilaafaadka beelaha iyo horumarinta nabad ku wada noolaanshaha (Galmudug State Media, 2023). Aqoon-is-weydaarsiga Shabakadda Nabadda ee Haweenka Galmudug: Shabakaddan, oo la furay 2021, waxay awood u siinaysaa haweenka in ay u doodaan nabadda iyo ka qaybgalka hababka xallinta khilaafaadka. (UN Women Somalia, 2023)</p>

GUNAANAD IYO TALOOYIN

Falanqaynta colaadda u dhaxaysa bulshooyinka raacatada ah ee Soomaaliya waxa ay daaha ka qaadysaa sababo isla xiriira oo cakiran oo keena colaadaha, iyo istaraatijiyyadaha maaraynta colaadaha iyo horumarinta nabadda ee ay adeegsadaan bulshooyinkaasi. Colaadaha ka dhasha daaqa waxa ay ka yimaadaan loollanka loogu jiro khayraadka yar ah sida dhul-daaqsinka iyo biyaha, waxa ayna sii huriyaan xiisadaha ku salaysan qabyaaladda, sara u kaca tabashooyin hore iyo hannaanka maamulka oo tabar daran. In kasta oo ay caqabadaahaasi jiraan, xoolo dhaqatadu waxa ay abuureen istiraatijiyyado ay ku yareeyaan colaadaha ayna ku xoojiyaan wadajirkooda nabadeed. Wuxaana ka mida hannaanka xallinta khilaafaadka ee soo jireenka ah, heshiisyada khayraad-wadaagga, iyo hindiseyaasha nabadeed oo ay bulshadu hormuudka ka tahay.

Jaantus 3: Istaraatijiyyadaha la soo jeediay ee lagu maareynayo colaadaha laguna hormarinayo nabadda degaannada Galmudug, Soomaaliya

Xoojinta dawladnimada iyo sarraynta sharciga	Dawladda Soomaaliya waa in ay mudnaanta siisaa xoojinta hay'adaha dawladda iyo sarraynta sharciga ee deegaannada ay ka jiraan colaadaha u dhexeyya xoolo dhaqatada, waxaana ka mid ah dhisidda nidaamyo wanaagsan, kor u qaadida helitaanka caddaalad, iyo hubinta in khayraadka loo qaysado si siman. Xoojinta dawladnimadu waxa ay xallin doontaa tabashooyinka jira, kana hortagi doontaa kororka colaadaha.
Xoojinta wada-xaajoodka iyo iskaashiga bulshada	Fududaynta wada-xajood iyo iskaashi joogta ah oo uu dhexeyya xoolo dhaqatada ayaa sal-dhig u ah dhisidda is-aaminaadda bulshada iyo xallinta khilaafaadka. Dawladda iyo maamullada degaannadu waa in ay xoojiyaan goleyaal ay bulshadu kuwada xaajooto, sida, shirar nadadeed iyo hindisooyin dhedhexaadin. Goleyaashani waa in ay bulshada u fududeeyaan goobo ay kaga doodaan tabashooyinkooda, ku mideeyaan aragtiyahooda, kuna gaaraan xalal dhinacyada faa'iido u ah.
Maalgelinta ilo nololeed oo kala duwan iyo maaraynta khayraadka si loo kordhiyo u adkaysiga dhibaatooyinka ka dhasha isbedelka cimilada.	In lagu dhiirigeliyo xoolo dhaqatada inay ka baddelaan ilahooda nololeed dhaqashada xoolaha ayaa yaraynaya tartanka loogu jiro khayraadka xaddidan. Dawladdu, iyada oo kaashanaysa hay'adaha caalamiga ah, waa in ay maalgelisaa ilo kale oo abuuraya dhakhli sida, beero, ganacsiyo yar yar, iyo tababarro xirfadeed. Sidoo kale, xoojinta siyaabo lagu maaraynayo khayraadka oo ay ka mid yihiin kaydinta biyaha iyo daryeelka dhul-daaqsimeedka ayaa yarayn kara hoosu dhaca khayraadka kana hortagi kara colaadaha.
Tababarro la xiriira xallinta khilaafaadka oo ay bulshadu hormuud ka tahay	Fulinta tababarro loogu talagalay dhedhexaadinta iyo xallinta khilaafaadka heer bulsho ayaa siin kara bulshada xirfado ay si wax-ku-ool ah ugu xallin karaan khilaafaadka. Barnaamijiyadani waa in ay diiradda saaraan awoodsiinta hogaamiyayaasha bulshada sida dumarka iyo dhallinyarada oo kaalin firfircooni ka qaata xallinta khilaafaadka iyo xoojinta wadajirkka bulshada.
Heshiisyoo ku aaddan wadaagga khayraadka iyo dhisidda guddiyo ay hogaamiyan kaabba-qabiilladu.	Samaynta heshiisyoo ku aaddan wadaagga khayraadka iyo guddiyo ka dhexeyya xoolo dhaqadatada ayaa horseedi kara in khayraadka loo wadaago si siman. Heshiisyadaani waa in ay qayb ka ahaadaan dhammaan daneeyayaashu, sidoo kale waa in ay qeexaan shuruuc cadcad oo lagu wadaagaayo khayraadka sida biyaha iyo daaqa.

<p>Taageeridda hindiseyaasha waa inay ku jiraan wada-hadallo ay bulshado hogaamiso, waxbarasho la xiriirta nabadda, nabad-dhiska ee bulshada. Kaalmadan oo kale waxa ay xoojin doontaa degenaashiyaha bulshada waxa ayna dhiirigelnaysaa dadaallo nabad-dhis oo waara.</p>	<p>Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ahi waa in ay ku caawiyaan taageero maaliyadeed iyo mid farsamaba barnaamijyada nabad-dhiska ee ay bulshadu hormuudka u tahay. Barnaamijyadan mashaariic soo saaraya dakhli, xoojinaayana iskaashiga iyo dib-u-heshiisiinta bulshada.</p>
--	---

TIXRAACYO

1. [FAO. \(2023, August 31\). Somalia: Food security and livelihoods - Drought situation update](#)
2. [UNEP. \(2023, July 13\). Presentation - UN Somalia: Climate change and conflict in Somalia.](#)
3. [Crisis Group. \(2023, November 17\). Climate change and conflict in Somalia.](#)
4. [SIPRI. \(2023, June\). Climate, peace and security fact sheet: Somalia](#)
5. [IOM. \(2023, May 31\). Millions of Somalis were uprooted due to conflicts and climate change](#)
6. [UN Somalia. \(2023, July 13\). Presentation - UN Somalia: Climate change and conflict in Somalia.](#)
7. [IOM 2022: New IOM and EU Project Targets Somali Communities Affected by Conflict and Climate Change](#)
8. [Berghof Foundation 2023 Somalia: Strengthening Infrastructures for Peace and Fostering Inclusive Dialogue in Galmudug State](#)
9. [African Union. \(2024\). African Union Mission in Somalia \(AMISOM\).](#)
10. [Garowe Online. \(2024, January 10\). Somalia: Puntland accuses Somali government of backing Galmudug.](#)
11. [Mercy Corps. \(2024\). Where We Work: Somalia.](#)
12. [ReliefWeb. \(2023, December 19\). Galkayo Peace Week: A Reflection on Strengthening Social Cohesion.](#)
13. [Search for Common Ground. \(2024\). Home.](#)
14. [Sheikh, A. K., Galvanek, J. B., & Grimm, P. \(2019\). Conflict Assessment, Galmudug State: An Analysis of Local Perspectives. Berghof Foundation.](#)
15. [Somali Peace and Development Network \(SPDN\). \(2024\). Home.](#)
16. [UNDP Somalia. \(2024\). Home.](#)
17. [UN SOM. \(2024\). United Nations Assistance Mission in Somalia.](#)



Xuquuq:

Waxaa qoray: **Elvirah Riungu** iyo **Badra Yuusuf**

Waxa si gaar ah loogu mahad naqayaa **Faysal Mataan** iyo **Mercy Chang'ach** oo si tifatiran oo xeeldheer u eegay faalladan kooban iyo **Yaxye Jacfar** iyo **Axmed Cilmi** oo si hal-abuur leh u qaabeeyey faalladan kooban.



RAAGSAN

Contact us

info@raagsan.com

www.raagsan.com

Follow us

@raagsan